Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kalfadhiga 8-aad kulankiisa:6-aad **Tr: 30.04.2016.**

Kalfadhiga 8-aad

Kulankiisa: 6-aad

Guntinta: 192 xildhibaan

Ajendaha:-

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Hadal-Jeedin Rai'sal Wasaaraha oo u abaaran Nidaamka Geedi Socodka 2016 ka.**
4. **Qeybinta warbixinta Guddiga xeer-hoosadka eek u aadan Mashruuc sharci ku saabsan Xuquuqda,Liiltirka iyo deeqaha ay yeelanayaan Siyaasiyiinta Dowladda Federaalka Soomaaliya.**

Shir-Guddoomiye, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

1.Waxaa shirka Furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawari,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka kariimka uu akhriyay,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

2.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in uu Golaha horyaalo labo ajende oo kor ku xusan,Guddoomi yaha wuxuu kaloo soo jeediyay in barito ay tahay 1da may waxan hambalyo u direynaa shaqaalaha Soomaaliyeed waxan ka codsanayaa in ay is abaabulan nidaam ay isku doortan

madama ay yihiin laf dhabarka dalka, waa in ay abaabulkas ku dadaalan sida uu qabo Dastuurka KMG in ay sameystan nidaam waxaan leeyahay hambalyo shaqaalaha aduunka oo dhan waa looga dabaal degayaa.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka,wuxuu soo jeediyaya,Xildhibaano waxaan galeyna nidam siyaasadeed si loo gaaro masiirka umada Soomaaliyeed haddaba waxaan xildhibaanada ku wargelinaya in ay dhamaantood soo xaadiran, kalfadhigan 8-aad, in uu aad muhiim u yahay qofkii ka maqnaadana waxaan gaarsiineynaa duubkii soo magacabey iyo guddiga Doorashooyinka una sheega in ay ka fiirsadan shaqadooda.

Xildhibaan:Kulalihi,wuxuu soo jeediyay,waa run bari waa maalintii shaqaalaha,shaqaalaha waxaa ka maqan mushaaraad, bilaha Nov- Dec, iyo marso hala siiyo, mushaaraadkooda hadii la bixin wayana ha loo yeero wasiirka wasaaradda maaliyadda.

Xildhibaan:Maxamuud Macain Yaxye,wuxuu sheegay,waxaa jira mooshin laga diyaariyay beelaha ka maqan doorkooda siyaasadeed ee aan xildhibaano laheyn.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka,wuxuu soo jeediyay, hala soo gudbiyo una dhiib Xogha'yaha

Guddoomiyaha Golaha, waxan mahad gaar ah aan u celineynaa Xukuumaddda madama ay soo gudbiyeen balantii ay qaadeen qorshaha Doorashooyinka geedi socodka 2016, mudane:Rai'sal wasaare ku soo dhawow.

Rai'sal wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,Mudane:Cumar C/rashiid Cali, wuxuu soo jeediyay,iyadoo la xasuusan yahay go'aankii ay wada qaateen Baarlamaanka FS iyo xukuumadda Federaalka Soomaaliya 28-kii bishii Luulyo 2015, oo ahaa in, iyadoo la eegayo xaalada dalka ka jirta, aysan suurta gal ahayn doorashooyin (qof iyo codkiisa ah) in la qabto 2016,Sidoo kale iyadoo Xukuumaddu xusuusaneysa warmurtiyeedkii ay soo saareen madaxda Soomaaliyeed 21kii bishii setembar 2015,ee ay ku heshiiyeen in ay daahfuraan hanaan wadatashi qaran oo lagu go'aaminayo hanaanka doorasho ee sannadka 2016 ee ugu haboon uguna macquulsan, oo si sharci ahaan ay u ansaxin doonaan una hireling doonaan hay'adaha federaalka ee ay arrintu khuseyso.

Iyadoo xuseysa labadii kulan ee madasha wadatashiga Qaran ee la kala qabtay Oktoobar iyo Diisembar 2015,iyo geedi socodkii wadatashiga qaran ee loo wada dhama lagana wada qeyb galay ee ka dhacay dalka oo dhan iyo qurba joogta oo gacan ka geysatay in la kala caddeyo mabaadi'da iyo xudduudaha muhiimka ah ee hanaanka doorashada ee 2016, si waxtar lehna

ugu qeyb galeen una taageereen xubnaha Baarlamaanka Federaalka oo ahaa qeybta ugu weyn ee ka mid ahayd madasha wada tashiga Qaran.

Iyadoo manka ku heysa baaqii Muqdisho ee 16-kii Diisembar 2016, ee laga soo saaray dhamaadkii kulan weynihii labaad ee madasha wadatashiga Qaran,ee ay xubnaha Baarlamaanka Federaalku ka qeyb galeen laguna garowsaday natiijada wadatashiyada qaran oo ahayd inaan jirin hal nooc oo doorasho oo ay wada qaateen dhamaan dadka Soomaaliyeed, iyadoo la eegayo fikradaha kala duwan ee laga qabo afarta hanaan ee doorasho.

Iyadoo sidoo kale maanka ku haysa baaqii Muqdisho ee kor ku xusanaa oo dajinaya mabaadi' iyo howlo muhiim ah oo horseeda hanaanka doorashada 2016,oo ay ka mid tahay in hanaanku uu ka koobnaan doono in la sameyo Aqal hoose iyo Aqal sare,iyo ergooyin doorasho oo ay ku kulmi doonan kuna codeyn doonan caasimadaha dowlad goboleedyada federaalka,iyagoo ay ka mid yihiin wakiilo ka socda haweenka,dhalin yarada iyo bulshada rayidka, iyo inay jiri doonan tiro ugu yar oo cayiman oo haweenka loogu qondeeyay labada aqal ee Baarlamaanka.

Iyadoo xusaysa qaraarkii ka soo baxay Golaha Shacabka Federaalku 27-kii janaayo 2016,ee uu ku caddeeyay inuu soo dhaweyn doono hanaan kastoo doorasho oo looga guuri doono Agoosto 2016,ee la isku afgarto.

Iyadoo garowsan Go'aankii Dowladda Federaalka Soomaaliya,oo ahaa go'aan ay si wadajir ah ku gaareen Golaha Wasiirada Dowladda Federaalka kulankooda caadiga ahaa 28-kii Janaayo 2016 kuna saabsanaa nidaamka doorasho ee hanaanka doorasho ee 2016.

Iyadoo ayidaysa dadaalladii lagu bixiyay wadatashiyadii lagu gaaray heshiisyadii ku aaddan hanaankaan doorasho ee ugu haboon uguna macquulsan ee la qabto sannadka 2016, uu ka mid yahay heshiiskii 3-dii Apriil 2016 dhexmaray Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Puntland.

Fadlan eeg Lifaaqyada

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu soo jeediyay,maadama mashruucan uu mid muhiim yahay soo aqriya hanaanka doorasho ee la idiin qeybiyay ka dibna isniinta aan u yeerno Rai'salwasaaraha si aad su'aalo u weydiisan adinkoo fahamsan warbixintaas,maalinta isniinta labada gelin waa la shaqeynayaa.

Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyay, waqti alle waqtigii ay dhaceyso doorasho xildhibaanada in fursad la siiyo oo 2 bilood ah masiirka Soomaaliya gacantiina ayuu ku jiraa.

Xildhibaan:Khadiijo Maxamed Diiriye,waxay sheegtay, anaga waqtiga aad sheegtay Agoosto 21, anaga xildhibaano ma nihin.

Kalfadhiga 8-aad Kualankiisa:6aad, uu shir Guddoominayay, Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu sheegay in uu shirka xiran yahay sacada markey ahayd 1:20 gd.